

HENNEPIN COUNTY
HOUSING AND REDEVELOPMENT AUTHORITY

Habraacayada Gargaarka Dhaqaale ee Ganacsiyada YarYar.

Abriil 22, 2020

Si loo siiyo gargaar ku meel gaar ah ganacsiyada yaryar ee deegaanka Hennepin County ee saameynta xun uu ku yeeshay cudurka COVID-19 ku, Gargaarka Dhaqaale ee ganacsiyada yar yar ee Hennepin County (Hennepin County Small Business Relief Fund) waxa uu siin doonaa amaahyo laga yaabo in la cifiyo aakhirka oo gaaraya \$7500 ganacsiyada yaryar ee u baahan gargaar. Gargaaraddu waxa ay ka caawin doonaan ganacsiyada bixinta kharashyada lama horaanka ah sida, kirada, moorgeejka, korontada.

Gargaarka Dhaqaale waxaa maamula adeegyada la yiraa (Open to Business) hay'ad beesha ka dhex jirta oo samafal ah oo ay leedahay hay'ada [Open to Business, Metropolitan Consortium of Community Developers (MCCD)], oo hadda siisa gargaar farsamo iyo helid dhaqaale ganacsiyada Hennepin County oo dhan. Mudnaan ka hor marin ah ayaa la sameyn doonaa iyadoo la kaashamnayo ururada bulshada ee deegaanka, dadka danyarta ah, dadka madowga ah, iyo wixii kale ee xanibaad ku keeni kara khayraadyada kale ee ganacsiyada yaryar.

Qodobada

- Hal mar oo amaah aakhirka la cifiyi karo oo gaaraysa \$7500 la bixiyo, iyadoo lagu salaynayo heerka waxyelada dhaqaale uu keenay cudurka COVID-19 kharashaadka xaq u yeelan kara ee hoos lagu qeexay
- 0% dulsaar ah, muddo 36 bilood ah, aan la iska rabin in la bixiyo muddo 12 bilood ah
- Amaahda 100% waa la cavinaya 12 bilood ka dib, laakiin waa inuu ganacsiygu uu sii wadaa inuu sii furnaado uuna ka hawl-galo Degmadda Hennepin uuna ceeb la' yahay waana inuu keenaa dhamaan dukumiintiyada la iska rabo
- Dhaqaalaha waxaa loo isticmaali karaa in lagu bixiyo kharashyada hawlgalka ee ganacsiga muddo ilaa labo bilood ah, oo ay ku jiraan kiradda, bixinta moorgeejka, korontada, bixinta canshuuraha iyo kharashyada kale ee lagama maarmaanka ah ee aan ka ka hayn mushaarka shaqaalaha sida uu u ansixiyey maamulaha dhaqaalahu.

Ganacsiyada Xaq u leh

Ganacsiyaddu waa inay ka soo baxaan dhamaan sharuudahan soo socda laga bilaabo

HENNEPIN COUNTY
HOUSING AND REDEVELOPMENT AUTHORITY

Maarso 1, 2020 si ay xaq ugu yeeshaan gargaarka. Mulkiilaha ganacsigu inuu sharci ku leeyahay wadanka iyo in kale ma ay saameynayso xaq uyeeladkiisu.

- Waa khasab in ganacsiga laga leeyahay uuna ka hawlgalo Degmadda Hennepin.
- Waa khasab inuu lahaa ugu yaraan 1 shaqaale oo xaq u leh foomka (W-2) oo aan ahayn mulkiilaha bishii Maarso 21, 2020 uusana lahayn shaqaale ka badan 20 sida uu qabo nidaamka ah in dakhligu ka yaraado \$ 1 malyuun sannadkii.
- Waa khasab in gacansigu uu hawlgalayey ugu yaraan 6 bilood ka hor Maarso 21, 2020
- Waa khasab inuu shati leeyahay, aana wax canshuur ah lagu lahaan ka hor Maajo 15, 2020, hadii ay khuseeyso
- Waa khasab inuu cadeeyo in dalkhli badani ka dhumay ilaa iyo Maarso 15 (looma baahna wax kiridhi eegid ah ama curaar lacageed ah)

Ganacsiyada Qaarkood xaq uma laha dhaqaalaha oo ay ku jiraan kuwan:

- Gacansiyada guriga ka furan; kuwa aan lahayn rugo ganacsi u furan
- Ururadda samafalka
- Dadka iskood u shaqeysta, qandaraaslayaasha madaxa-banaan ama ganacsiyada aan lahayn shaqaale kale oo aan ka ahayn mulkiilaha
- Shirkadaha waaweyn, ee xarumaha ku leh gobolo-badan
- Ganacsiyada musalifay ka hor Febraayo 29, 2020
- Ganacsiyada dakhligoodu inta badan ka soo galo khamaarka
- Ganacsiyada wax dakhli ahi ka soo gala filimada iyo sawirada qaawanaanta
- Ganacsiyada dakhligoodu inta badan ka soo galo maalgelinta; ganacsiyada ganacsiyada kale la macaamiltama; guryo kala gadashada, guryaha la kireeyo ama maamulka guryaha; tabeeleyaasha ama qalqaalada

Ka sokow Gargaarka Dhaqaale ee Ganacsiyada yaryar ee Degmadda Hennepin (Hennepin County Small Business Relief Fund), Ganacsiyada waxaa si weyn loogu dhiirigalinaya inay codsadaan dhamaan wixii gargaar dhaqaale ah ee la heli karo ee cudurka COVID- la xiriira, sida Hay'ada Maamulka Ganacsiyada Yaryar [[Small Business Administration](#)) (SBA)] Amaahda Halaaga Waxyeelada Dhaqaale [Economic Injury Disaster Loan (EIDL)] iyo waxa la yiraa [Paycheck Protection Program (PPP)], Amaahda Ganacsiyada yaryar ee Gobolka Minnesota [State of Minnesota Small Business Emergency Loan (SBEL)], iyo barnaamijyo



HENNEPIN COUNTY
HOUSING AND REDEVELOPMENT AUTHORITY

kale oo deegaanka ka jira. Laakiin, si aan ugu adeegno inta ugu badan ee ganacsiyo ah ee aan u adeegi karno, ganacsiyaddu xaq uma yeelan doonaan inay labo gargaar ka kala helaan hay'ada Gargaarka Dhaqaale ee Ganacsiyada yaryar ee Degmadda Hennepin (Hennepin County Small Business Relief Fund), IYO magaalada ama gobolka gargaarkiisa la yiraa (SBEL). Ganacsiyada hela gargaarka ay bixiso dowlada dhexe wali xaq waa u leeyihiin Gargaarka Dhaqaale ee Ganacsiyada yaryar ee Degmadda Hennepin (Hennepin County Small Business Relief Fund), laakiin waa khasab inay u isticmaalaan dhaqaalaha ay ka healaan Degmadda kharashyada kale ee xaqqa u yeeshaa in lagu bixiyo ee aysan bixinayn dhaqaalaha dowlada dhexe.

Habka Codsiga

- Foomamka codsiyada waxaa la aqbi laga bilaabo 27 **ilaa iyo Maajo 8, 2020 duhurkii**.
- Codsadayaasha waxaa la waydiisanayaa inay foomka cogsiga ah ka buuxiyaan shabakada (web) halkan laga heli karo.
- Fadlan la [xiriir \(MCCD\)](#) hadii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta foomamka codsiyada.
- Hadii codsiyaddu ka bataan dhaqaalaha la heli karo, maamulaha dhaqaalahu waxa uu ku xulan doonaa cidda helaysa amaahda qaab bakhtiyaa-nasiib ah.
- Maamulaha dhaqaalahu, MCCD, waxa ugu sheegi doonaa cadsadayaasha codsigooda amaahda la ansaxiyo emayl ahaan ka hor bisha Maajo 15, 2020.
- **Kolka ay helaan ogaysiiska codsi ansaxinta**, cadsadayaasha waxaa laga rabaa inay soo gudbiyaan dukumiintiyadan soo socda 5 cisho gudahood ka hor xiritaanka qabashada:
 - Warqadaha Canshuur-celintii Dowlada Dhewe ee 2019 (Federal Business Tax Return) ama Canshuur-celinta Ganacsiyada (Business Tax Schedule)- taa oo ku salaysan nooca ganacsiga. Ganacsiyada aan iyagu wali buuxin Canshuur-celinta Dowladda Dhewe ee 2019 (2019 Federal Return) xaq waa u leeyihiin inay cadsadaan ayna keenaan dukumiintiyo u bedela warqadaha canshuurta oo sheegaya dhakhliga, waxayna kaloo u baahan doonaan inay keenaan Canshuur Dowlada Dhewe ee 2019 (2019 Federal Return), kolka ay xareystaan si ay xaq ugu yeeshaa cafinta amaahda.
 - Cadeynaha dakhliga dhumay ee la xiriira cudurka COVID 19. Codsadahu waa inuu soo gudbiyaa dukumiintiyada sida ugu fiican u cadeynaya saameynta dhaqaale uuna u aqoonsan karo in la ogolaan karo Maamulaha Barnaamijku. Qaar ka mid



HENNEPIN COUNTY
HOUSING AND REDEVELOPMENT AUTHORITY

dukumiitiyada la aqbali karo waxaa ku jira Canshuura Alaabta la Gado, Oraah Hore oo ay soo Gudbiyaan Qolo 3aad oo wax u Gaday Ganacsiga, Oraahaha Adeegyada Ganacsadaha, iyo Gadida ama Warbixinaha Lacagaha khasnajigu qabto.

- Cadeyn Shaqo hayn ka hor Maars 21 keeda 2020. Dukumiintiyada la aqbali karo waxaa ku jiri kara waxbixino hore oo qolo 3aad oo mushaar bixinta qaabilansay, Codsadaga Foomkiisa Dowladda Dhewe ee 941/Canshuurta loo shaqeeyaha ee Sedexdii biloodba mar la xareeyo (Federal Form 941/Employer's Quarterly Federal Tax Return), ama wixii Gobolka ama Dowladda dhewe laga xareeyey ee la xiriira canshuuraha mushaarka.
- Wixii kale ee dukumiinti ah ama akhbaar ah ee uu ka maarmi waayo maamulaha dhagaalahu si uu go'aamiyo xaq u yeladka, uu u diyaariyo amaahda, uu u qaybiyo lacagta amaahda ama uu uga soo baxo sharuudaha warbixinada barnaamijka.
- Keenid la'aanta dukumiintiyada la iska rabo waxa ay dhalin kartaa diidmo la diidi amaah-bixinta.

Ogow: Hay'ada Guryaha iyo Dib u Habeynada ee Degmadda Hennepin waxa ay xaq u leedahay inay wax ka bedesho habraacyada hadii loo baahdo si sida ugu fiican wax looga qabto saameynta cudurkan dillaacay.

